Qorshaha Dhameystiran ee 2040: Qoraalkii U Dambeeyey Dulmar Kooban

Qorshaha Dhameytiran ee Magaalada Minneapolis ee 2040 waxa uu gundhig u yahay koritaanka magaalada ee 20ka sano ee socda. Qorshahan waxaa hoos imanaya mowduucyo kala duwan sida guriyeynta, helitaanka shaqada, isticmaalka dhulka iyo sidee aanu u adeegsan laheyn wadooyinkeena. Magaalada Minneapolis waa mid koreysa oo is bedeleysa, koritaanku ma hirgelayo iyada oo magaaldu tahay mid gooni u qoqoban. Minneapolis, sida bulshada ku dhaqan magaalooyinka kale ee gobolka, waxaa ka go'an in ay qaaddo talaabooyinka muhimka ah ee xirfadda ku dhisan ee lagu gaarayo kooritaanka oo aan ku koobneyn oo kaliya magaalada laakiin micne u sameeya gobolka oo dhan.

Qorshaha dhameystiran waa mid ku saleysan ogolaashaha gudiga magaalada ee 14 hadaf, oo ay ka mid yihiin yareynta faraqa, helitaanka guryo dadku awoodo iyo shaqo ay nolol ka sameyn karaan, abuuritaanka bulsho isku xiran, iyo abuuritaanka bulsho caafimaad iyo isku dhafka dhaqaalaha ee bulshada.

Qoraalkan ugu dambeeya waa mid ka dhashay dadaal qoto dheer oo soo socday muddo laba sano ah iyo ururinta 10,000 oo faalo iyo ra'yi dhiibasho ah oo laga bixiyey muddadii afarta bilood ugu dambeysay ee dadweynaha loo furay. Ra'yi ka dhiibashada waxa ay qorshahan ka dhigtay mid xoog badan isla markaana qiime dhaqangal ah ugu fadhiya bulshada. Shaqaalaha magaalada waxaa soo gaaray ra'yi dhiibasho dhinacyo kala duwan ah oo lagaga hadlayey:

- Isticmaalka dhulka
- Tirada dadka
- Guryaha dadku awoodo
- Koritaanka bulshada
- Barnaamijyada waxbarashada
- Gargaarka ganacsatada yaryar
- Jiilasha kala duwan iyo isbedelka nolosha ee guriyeynta
- Qaab dhismeedka iyo baahida kaabayaasha dhaqaalaha ee dadweynaha
- Xiriirka ka dhaxeeya dadka degaanka wada deggan

Magaaladu waxa ay ku sameysay isbedel la taaban karo qorshahan taasoo ka dhalatay ra'yiga dadweynaha kaasoo aad ka rki kartaan qorashaha lagu soo bandhigay minneapolis2040.com. Isbedelkaas waxaa ka mid ah:

- Wax ka qabashada dhawr faalo oo tilmaamay sida aanay u cadeyn habka loo qoray qoraalkii hordhaca ahaa. Qoraalka ugu dambeeyey waxaa isku in si cad oo faahfaahsan loo soo bandhigo qodobada, iyo si wanaagsan loo agaasimay qeybaha qaarkood si ay u noqdaan kuwo si fudud loo fahmi karo. Tusaale ahaan, waxa ay Magaaladu isku dayday in qeexdo waxa ay u taagan yihiin xarfaha AMI (Dakhliga Heerka Dhexe ee Degaanka), kaasoo dhawr jeer lagu sheegay qorshaha iyada oo aan la qeexin.
- Kadib markii si aada looga fiirsaday ayaa la go'aansaday in hoos loogu dhigo tirada guryaha la ogolaankaro in laga dhiso boosaska halka qoys 3 unug oo keliya. Dhismooyinkan dhowrka unug kakoobani waa inay waafaqaa shuruudaha sida inta ay ujiraan wadada ama dhismayaasha kale, dherarka iyo baaxadda guryaha qoyska keliya. Qorshuhu wuxuu kaloo dhiirigelinayaa inla kor

looqaado tayada naqshadda marka koodhka aagga la cusboonaysiiyo. Bedelkani qorshaha ku meelgaadhka ahi wuxuu qirayaa inay jireen caqabado la aqoonsaday xilligii doodda dadwaynaha, iyaddo isla markaana laga fursanwaayay in la tixgelinayo baahida ah inla baahiyo noocyada kaladuwan ee guryaha magaalada.

- Wax ka qabashada cabashooyinka laga soo gudbiyey dhererka dhismayaasha ee dhulka gaadiidku ku badan yahay. Laba isbedel oo waaweyn waxaa ka mid ah dib ugu noqoshada goobaha waqooyiga ee wadada Lowry iyo koonfurta wadada 38aad. Qorshaha waxa uu wax ka bedelay ogolaashaha dhismayaasha lix dabaq ah ee wadooyinka waaweyn ee ganacsiga oo laga dhigay dhismayaal ka kooban afar dabaq. Isbedel weyn ayaa sidoo kale lagu sameeyey hareeraha wadooyinka gudaha ee ku dhagan wadooyinka gaadiidku maro (dhismayaasha dhinaca kale ee wadada ku yaal). Isbedelkan waxa uu iminka ogolaanayaa dhismayaasha 2.5 ka kooban ee aan aheyn kuwa sadexda dabaq ah sidii horey loogu taliyey. Iyada oo isbedelkaani weli kordhinayo tirada dadka, lana socdo hadafka qorshaha, waa mid looga jawaabayo ra'yi dhiibashada dadweynaha ee dhererka dhismayaasha ee qoraalka horudhaca ah kaasoo wax badan ka duwan sida ay xaaladdu iminka tahay.

- Iyada oo si faahfaahsan looga jawaabayo baahida cutubka guryaha dadku awoodo, taasoo markii dib loo saxay loo bedelay dadaal magaalada oo dhan u dhan tahay ee sidii loo diyaarin lahaa qorshe istaraatiijiyadeed oo lagu abuuro guro dadku awoodo. Cutubkan waxaa iminka ka mid ah faal balaaran oo lagu qeexayo baahida loo qabo dhisidda guryo dheeraad ah iyo kuwa dadku awoodo, wax ka abashada arrimaha la xiriir hoy la'aanta.

Qoraalkii ugu bambeeyay qorshaha ballaadhan ee 2040-ga waxaa lasii daayay bisha Sitember 28-dii si ay u eegaan guddiga qorshaynta iyo golaha magaalada. Wixii faalla ah waxaa loo gudbinkaraa guddiga qorshaynta iyo golaha magaalada bartooda internetka ee minneapolis2040.com. Bogga interactive website waxa uu fursad idiin siinayaa inaad aragtaan qorshaha oo la calaamadeeyey ama mid aan laheyn wax calaamad ah oo qeyb qeyb loo kala saaray. Nuqul ka mid ah qorshaha oo u qoran habka PDF waxa aad ka heleysaan:

Gudiga Qorsheynta waxa uu qabanayaa laba kulan oo dadweynaha u furan 29ka Oktoobar iyo Gudiga Maamulka oo qabanaya kulan dadweynaha u furan bartmaha bisha Nofeembar. Gudiga Magaalada waxaa la filayaa in ay cod u qaadaan Qorshaha Dhameystiran bisha Diseembar ka hor inta aan qorshaha loo gudbin Maamulka Magaalooyinka.